

Su'aalaha Badanka la Iswaydiiyo Kadib Ogaysiiskii Karkarinta Biyaha

Macluumaadka soo socda ayaa laga bixiyaa si looga jawaabo su'aalaha ka imanaya dadwaynaha ee ku saabsan sida ay tahay inay uga jawaabaan talobixinaha karkarinta biyaha ee dadwaynaha ee la soosaaray iyadoo la cuskanayo xeerarka talobixinta USEPA/OHA. Nidaamyada biyaha dadwaynaha waxa looga baahan yahay inay soosaaraan ogaysiiyada karkarinta biyaha markay jiraan duruufaha soo socdaa:

Nidaamku markuu ku fashilmo inuu buuxiyo jaangoynaha jeermiska

Nidaamku markuu ku fashilmo inuu buuxiyo jaangoynaha daawaynta ama xareednimada

Nidaamku markuu ku fashilmo inuu si ku filan jeermiska uga dilo biyaha la cabbo

Nidaamku markuu ku fashilmo inuu joogteeyo cadaadis togan dhanka qaybinta

Xaaladaha qaar halisuhu waxay noqon karaan qaar kala daran, laakiin gud ahaan aan kala duwanayn. Jiritaanka nooluhu waa caddayn kama dambays ah oo ku aaddan suurtoagalnimada waxyeelo, jiritaan la'aanta jeermis-dile waxay ka dhigan tahay in noole ku filan uu gaari karo macaamiisha, waxayna xareenimada hoosaysaa carqaladaysaa jeermis dilista taasi oo horseedi karta in noole ku filan uu badbaado uuna gaaro macmiilka. Marka ogaysiisyada karkarinta biyaha ay jiraan, macaamiishu waxay u baahan yihiin inay ogaadaan isticmaalada ay u sii wadan karaan si badbaado leh, iyo isticmaalada uga baahan karkarinta biyaha kahor isticmaalka. Maadaama wax ka mid ah xaaladaha sare ay keeni karaan in biyo aan si fiican loo daawayn ay gaaraan qoysaska, taladeena ku saabsan isticmaalada badbaadada leh waa inaysan noqon qaar isbedbeddela. **Biyaha loo isticmaalayo hawlaha u baahan karkarin waa in la gaarsiiyo heer ay biyuhu isrorogaan muddo 1 daqiiqo ah.**

Hawlaha <u>u</u> baahan in biyaha la karkariyo:	Hawlaha <u>aan u</u> baahnayn in biyaha la karkariyo:
Cabbitaanka	Qubayska
Dhaqitaanka cuntada la cuno iyadoon la karin ama la dubin	Ku qubaysashada baafka
Ku darista biyo cunto iyadoon la	Dhaqista ama xallaynta weelka*

karin ama la dubin	
Samaynta barafka	Dharmayrka
Nadiifinta meelaha cuntadu taabato	Nadiifinta ama masaxidda guud
Cantuugidda ama ku luqluqashada biyo	Gacmo-dhaqashada
Indho dhaqista	Waraabinta rabbaayadda
Ku qaadashada biyo daawooyinka	U dhaqista rabbaayadda
Cadayashada ilkaha	Biyaha ama waraabka dhirta

*Suxuunta iyo weelka nadiifta ah waa in lagu xalleeyo biyo ay ku jiraan 1 qaadada cuntada ee qoyska oo biliish ah halkii gallon ee biyo ah (100-200 ppm kalooriin) lana sugaa inay hawadu qallajiso kahor isticmaalka.

Aaladaha daawaynta guriga ee aan karkarin ama kiimiko ahaan jeermiska biyaha uga dila ee wata jeermis-dilayaal la aqbali karo looma tixgaliyo beddiilo la isku hallayn karo oo gali kara booska karkarinta biyaha.

Fiiro gaar ah: Xarumaha shatiga ka haysta waaxda caafimaadka degmada ama Waaxda Beeraha waxa dhici karta inay leeyihiin shuruudo nadaafadeed oo dheeri ah. Ka hubi wixii faahfaahin ah wakaaladda maamusha ee ku habboon.